



# Laboratory Services

## CLOSTRIDIUM DIFFICLE PCR

Fariimo Ururin Saxaro

### Fariimo:

1. Ururinta, waxa laguu siiyay waxyaabahan soo socda:
  - Koofiyad ururin saambal
  - Weel ururin oo leh fur la maroojiyo oo midabkiisu yahay liin
  - Mariye loox ah
  - Waraaq fariimo
2. **Ku qor weelka leh furka la maroojiyo ee jeermi-dilan ee midabkiisu yahay liin magacaaga hore iyo ka dambe, taariikhdaada dhalasho iyo taariikhda iyo wakhtiga ururinta.**
3. Sare u qaad sal-saarka musquusha oo koofiyadda ururinta saar qarka musquusha (iyada oo dhinaca qaloocan u jeedo xagga dambe ee musquusha).
4. Deji sal-saarka musquusha, si uu koofiyadda ururinta meesha ugu xejiyo. Ku saxarood ama xaar ku rid koofiyadda. Waa in saambalka saxarada aanay la socon kaadi ama waraaq musqul.
5. Qaddar yar oo ah saambalka saxarada ku soo qaad mariyaha looxa ah adiga oo ka soo qaadaya meelaha u muuqda inay leeyihii dhiig, xab ama ah biyo-biyo. Marka saambalka aad ku ridid weelka, u hubso in furka la maroojiyo si adag loo xidhay, si aan daadasho u dhicin.
6. Si dhammeystiran u dhaq gacmaha.
7. **Qaboojiye ku hay** saambalka illaa laga keenayo shaybaadhka.
8. **Gudaha 24 saacadood**, ku keen saambalka oo **baraf saaran yahay**, oo ku jira bac leh quful ah siib/jinyeer.

